

WAR DEDEG AH



**Hay'adaha ilaalinta sharciga ee deegaanka ah waxay taageerayaan amarka fulinta uu soo saaray Guddoomiyaha Gobolka Walz ee "Joog Gurigaaga" iyadoo loo adeegsanayo waxbarid iyo dhiirigelin.**

March 26, 2020 – Rochester, Minnesota – Xafiiska Sheriffka ee Degmada Olmsted (OCSO) iyo Waaxda Booliska Rochester (RPD) waxay si adag ugu dhiirigelinayaan deganeyaasha inay u hoggaansamaan qawaaniinta lagu soo saaray Amarka Fulinta ee Walz "Joog Gurigaaga" (EO # 20-20), laakiin hay'adaha ilaalinta sharciga deegaanka si adag ugama raadin doonaan waddooyinka ku xadgudbayaasha Amarka Fulinta.

Xogta aan aragno ilaa hadda waxay cadeyneysaa aaminsanaanta aan ka qabno in reer Minnesota ay iskood isu maamulaan," ayuu yiri Taliyaha Booliska Rochester James Franklin. "Dadku waxay hirgalinayaan tilmaamaha kala-fogaanta bulshada iyo – sida ay u badan yihiin - joogida guriga."

OCSO iyo RPD waxay sii wadayaan xoojinta taraafikada iyo xad-gudubyada kale, laakiin iyagu uma joojin doonaan muwaadiniinta arrimaha la xiriirta EO # 20-20. Waxay sidoo kale rabaan inay xoojiyaan in shakhsiyaadka lagu dhiirigaliyo inay helaan hawo banaanka ah oo inay ugu jimicsadaan bannaanka, laakiin ay sidaas sameeyaan iyagoo sii wadaya talooyinka kala-fogaanta bulshada.

Gobollada kale waxay codsanayaan darawallada inay haystaan rukhsad loo-shaqeeyaha siiyey inay ugu safraan shaqadooda, laakiin waqtigan xaadirka ah, xaashidan la weydiin maayo ama hay'adaha ilaalinta sharciga ee Minnesota baarimaayaan

In kastoo Amarka Guddoomiyaha Gobolka uusan si gaar ah uga hadleynin goob kasta oo shaqo ama waxqabad shaqaale, Sheriff Kevin Torgerson ee Degmada Olmsted wuxuu xasuusinayaa deganeyaasha inay isticmaalaan dareen guud oo ah waxa loo arko inay lama huraan u tahay amarka "Joog Gurigaaga" inuu dhaqangalo. Sheriff Torgerson ayaa yidhi: "Waxaan dadka ku dhiirigelinaynaa inay isticmaalaan garashadooda ugu wanaagsan ee go'aan qaadashada markay tahay inay safraan iyo in kale." "Joogitaanka guriga iyo kala-fogaanta dadka waxay danta ugu fiican u leedahay qof walba caafimaadkiisa iyo nabadgelyadiisa waqtigaan xaadirka ah oo ay ku jiraan kuxigeenadeena iyo saraakiisheena."

###